



HOGHOL

Dooqaadky Af Soomaaligy - Maayky - HOGHOL Soomaali Maay Newsletter
| Bil'ly - Monthly |

Walaa Tiroduung ki jero

- Taariikdy Jamaa'atha Baardheere (1-2)
- Qeepoo Dooqaadky (2-4)
- Heesty Abwaan Balwaddiid (4)
- Magmaag (4-5)
- Dhaghanky (5)
- Manaahijta walbarashoothy Dowladda Federaalky (6)
- Wargiling (6)

Tifaftiry: Abdullahi Sheikh Mahamad

Aasaasy - Founder

Goobty Horumariyoky Afky Maayka (Afmaay Development Center), maay la aasaasy sanadky 2017. Sababty liing aasaasy maaybuwaaha horumariyowky afky ii dhaganky Maayky (Af-Soomaaligy Maayky).

Maay ha dhawaayaanee dhammang dadky ky howling horumariyowky afky-aayow, Af-Maay.

Abdulkadir Abukar Sheikh, Founder Af Maay Development Center (ADC)

Email:

afmaaydevelopmentcenter@gmail.com

Facebook: <https://www.facebook.com/afmaaydevelopment/>

Office: Baidoa, Sheekh , S/Land, Muqdishu i i Örebro, Sweden.



Taariikdy Jamaa'athy Baardheere: Qeebtii 4aad Baardheere Historia=Baardheere History

Sheikh Abiikar Eding Dhurry (24 Sanno, 1805 -1828)

Maddi Sheikh Aly dhurry dhimmithy, Sheikh Abukar Eding dhurry iye li wareegi ulul-amrinimaathy Jameeada Baardhere sithy haayti derdaarty Aw Sheikh Aly dhurry. Sheikhy weybaa ky mid haayey asaasiyaashy beledky oo Sh. Ibreeng Hassang Yabbarow ly kooyi. Wey ky sifoowey geesinimy i sabar badang. Wey suubiyeey dadaal wiing oo findinty dinty islamky. Wey bathaiteey madaarisidy diinty lyky baradaayi beledky i buuliyaalky.

Weyba jirteey baahy eh in nebbidy beledky li sugo, oo ly ogaado dadky beledky ha galaaw i dadky ky bahaaw, isly markaasny dugaag luku nebed gali dad i duunyi. Sheikh Abiikar weybaa eed linky kasee in usy waqtishey ly dhisy derbigii baardhere ky wareegsinaayi oo liing kasow 'Binisky'.

Sidy ly sheegi derbigy wey lyky dhisey shiid, wang i boongshy.



Derbiga biniska reedshey weybaa lukku qodey god ling kasow "Qandaq" oo haayi noo dhifees eh.

Wey linky taly galey ing derbigy lahang korny. Beledky wey liing suubiyey lammy irid. Irridy wiing weywa tan aargady beledky. Irrdy kaly wey ky taaleey jidky saakow liinky bahaaw hegshhe.



Boodkii (derbighii) ingky horreeyi (Bini-Dhisky) Jamee'atha Baardheera ky dhistry si liingku nebed gala othow i dughaa

Lammathaas irid wey ly hiry jirey iriithy maddy dhiithy. Wey kaloo liing baahitheey ing ly suubiyo heer liky dhaghaaw jameeada oo waafiqsing kitaably Ally i sunnaady rasuulky.

Heerkaas weybaa ku mid haayeey haang hoos ky abtughung:

- Ulul-ammrighi weywaa imaamky, sheekhy kitaaby akhriyow i qaaligy beledky.
- Hukunky dadky jameeada wey ky dhisinaayey suluh "sabeeng, shyshafy i afar-afarty, taaso sheenaasy inis tanasulow i is efis.
- Lang welby oo fiyaaw, isly markaasny awoody ing salaady hiraabty i ishaady hamiinky misaajidky haky tukuthy .
- Salaady jimaaty ba'dishey Ulul-amrighy wa'ady ky reed warbihing i awaamir iya biyee jeerky walaaghy ha deresi. Jameeatha eetha ing sughaasy awaamiirtaas beled i buuly. Dadka buulooyaa deghaaw wakiily iya ha dirsidaayaang.
- Hamiingky ishaathy ku reed irdo wal hire, dad ilaaliyaaw iyee liing suubiyyi.
- Waqtighii hoolly beeroo way ly sugree ulul-amrighy go'aanshey si abuurky, falky, goosmeethy isly marko liniisly hool galo, iyo ing shimbirty i hoolo liniisly dhooro.
- Wey jirey dad ing qaabilsing sakaathy beero dalagy ky bahow, hoolaa i maalky oo ly siyaayi masaakinty.
- Bilaangty ing is asturaang. Wey hiridy jireeny ambur garbeed i kuff. Isly markaasny shileediye in hamiigky ishaady ky damby ing wareegny.
- Weyba ku reebinaayeey falalky munkarky beledky dhathiis.

Sheikh Abiikar wey jameeada Ululamri- inga haayey muddy 23 sanno eh.

Diaariyng: Omar Abdulqaadir Sh. Abdirahmang

Qeepoo Dooghy: Ha Bandhikow Aragty Usub Alfabeetathy Af-aayky

Alfabeetathy Alif- Maayky maay ku koobingtaa 23 shibly (**konsonanter**) i 6 shagal (**vokaler**). Tothoby ku mid eh labaatung i sediithy shibly may ku kobinyinaa lammy haraf shibly eh oo isky dhegen, sidy (**jh, th, dh, sh, gh ng, nj**) haanaas oo liing kasaaw (**DIGRAFER**) lammy haraf (**shibliyaal eh**) oo isky dhegen. Laakiing may jertee dood ku teeghing inii harfoogaas kuliishoo shibly haang liing isticmaalo i inii ed (**tjud- sound**)

haang liin isticmaalo. Taas oo ing baahang inii si feyle liin dereso intii haraf (**Alifbeety**) haang amy lamaany (**DIGRAFER**).

FG: Maayky ma jirty harfoo ki bilaabathaayang **p, th, gh, ng**, haanaas oo injirny erey ku bilaathooy Afky Maayky, laaking may galaayaang dheta. Si ing sahlanaato in liing fahamo, qaabky harfoogaas.

Tusaaly:

P: heped

th- wethaan.

gh- maghaar

ng: lang

Dadky inty bathang Af-Maayky inistimaalayaang may qapaane ing harafky (Ny) ku koobinyi shiblighy (n) iyo shaghalky (y). Laking, ani wey hajeediyeey inii harafky “**ny**” liky bedelo harafky “**nj**” kaas oo ku kooping shiblighy (**n**) i shiblighy (**j**) o linis jeeyi (**n+j = nj**). Maadaama aragtithuung usubung shaghal haang ing istimaalaaso harafky “**Y**”, may ki feylantaa, inii harafky “**j**” liky bedelo meelly “**y**” **tha**. Tusaaly haang. **Njaanyuur** (cat, kat).

Shibly wiing i shibly yar shagal wiing i shagal yar

B b	P p	T t	J j	JH jh
D d	TH th	R r	S s	SH sh
DH dh	G g	GH gh	F f	Q q
K k	L l	M m	N n	NG ng
W w	H h	Y y	Nj nj	A a
A a	E e	I i	O o	U u
				23-Shibly (konsonant) 6 shagal (vokaler)

Shaghal

Afky Maayky weey leyaa li shaghal, shan shaqghal wey leyiiinaa shaghal gaab (**kort vokal**) i shaghal dheer (**lång vokal**). Haanaas oo eh a, e, i o u. Laakiing shaqalky **y**, shaghal gaableey leyi, shaqal dheer ma le’.

A a	E e	I i	O o	U u	-
------------	------------	------------	------------	------------	----------

Dadky Afky Maayky atheegithaaw amy wal ki qoraaw, may inta badang Shaqalky **y** ing kasaayaane **shoranshoor** oo eh haraf maddona shaqal eyi madoona shibly eyi. Laakiing

qoraaghy Abdulkadir Abukar oo ku tirsing Gobty Hormariowky Af Maayky walny ki qoraaw Dooqaadky (**Hoghol**) wey ky doodahaayee waana ha jeethieey inii liing istimaalo harafky "y" shagal (**vokal-vocal**) haang oo bes eh kaas oo usu taawiyow inii ky haboonyi meeloo shaleedyeey leey liing etheegsitho harafky "y".

Diariying: Abdulkadir Abukar Sheikh

Abdulkadir Abukar Sheikh

Maalling Afky-Maay/Maxaa

Modersmåls lärare/Interpreter - Somaliska Maay/Maxaa Sweden

Fikirky eh ing dhawaaghee ku kooping lammy haraf ed hang leey liing qaathitho i ing kale miky kooping Afky Maayky shaleentiis Maxaa tirighina taabithaase maynaa futhuthaayo koree ini Af Soomaalighy oo guud hang wili ing sal dhikine liing sal dhiko.

Fikirkuung usy ha jeethiyi, qofkii fikir ku geddising omboo dood ku qapo haskuly har-iirooy Abdulqaadir adreesky i telefoongky baalky ingky damboyo (**wargilinty**) ku muuqithaang.

Soomaali (Maay Hees, Maxaa Hees); Swedish sång, English Song Hees li maghy bahi Afkii Aayow Hay ing Hiiliyooy

Amakaagsynaa Ishreersynaa,
Igha jeree Hay ing hiiliyoow.
Oghoong eebishee maa Ibny aadyng miing roong,
Iig hortii deleelaa Hay ing hiiliyooy
Afki aayow ha ing hiiliyoow.

Lamby afshey opootheryngsheya, Opooyti arlytheenga
Eghyng ay liing ku tabnee Hay aruuriyoy
Afki aayow hay aruuriyoy

Iskool mal ky dhikaa iiloysynaa,
Ehelsheey unywa, Hay awlaaliyoy,
Uurkooley ughaaryte is aruursyneena,
Aparby reedshe aarynga Hay dereesiyow,
Owlaadeeng dhong Hay ing qiipiyoy

Lamby afshey opootheryngsheya, Opooyti arlytheenga
Eghyng ay liing ku tabnee Hal aruuriyoy
afki aayow hay aruuriyoy.

Halabuurkii Afyaal Balwadiid Abughaalkii Maslah Isak Boorow-Ably Kuusow

Magmaag (Ordspråk): Ay miir leh/miir lohoo, maas li warsithee

Mag maagduung maaybaa sheeghaasee ing demenee bershoo oo dadky eed ing mashquulaayaang (hool beereed, arra geddis, abuur, falow, shimbir dhoorme, i shaftaal) omboo eed ing dhiboothaayaang (ol ii abaar) oo qof kastuba tiitiis li rafathaaw iyee hoo qof qof kale wal warsatho (kaalme, amaa/maasi omboo warka maddaas jero) iyee la arre

aay miir lehoo maas li warsathee oo li too e' aay tabar i wakti haaye oo beer dad kale ha falee ama aay wal qabe oo deeq ama deeng li warsathee ama aay wal oghoo li wareeysith- ee maadaama dadky oo idil isla mashquulsinyaang oo qof kasto tiitiis ku bathiyi waay- signi. Mag maagda may kaloo liing istimaalo koree ing maddii farhad jerto aroos ama gudmaang oo dadka dhong isli farahsigni oo hoolla arooski ama gudmaangkileey liki mashquulsinyi. Aay miir lehoo mass li warsathee oo li to e' aay maskantiis deqenoo wal li warsathee?

Diyaaring: Omar Abdulqadir Sheikh Abdurahman

Fasiraad: Abdullahi Sheikh Mohamed

Dhaghang (Kultur): Dalaga beeroo



Garoor Misgy

Tub Bal misgithy luku goosithi

Diyaaring: Abdullahi Sheikh Mohamed

Misgeethy maddii karto bislaato lammy siwaa liing goosithee. Reer shabeellaha hoose balky misgeethy ki roogto wal shafee wal tupee. Maddii misgeethy si fayle ing engjeto, sapuulky waku gooyee dhulkaa liing haaghee, kapaayaa liky wareejhiyee meelaasaa liky rithee (garoor iyee le erree) ilaa tubky ku dhamathaaw. Misgeethy sapuulky eh wal qaa qaathee god omboo bakaaraa liky shibepee. Balkiny wal tupee hoolaawaa kis kis liingky dhikee. Gopolle Baay i Bakool, balky rooghoo sapuulky luku gooyee ga-rooraa ling haaghee liky rithee. Balky hoolaawa liky dhiyee daaghaayaang.

Goobty Horumariyowky Afky Maayky
Dooqaadky Af-Maayky

Hogol

Af-Maay Newsletter
Af-Maay Development Center (ADC)
Email: afmaaydevelopmentcenter@gmail.com
Office: Baidoa, Sheekh, S/Land, Muqdishu i Örebro, Sweden

Goobty Horumariyowky Afky Maayky
Dooqaadky Af-Maayky

Hogol

Af-Maay Newsletter
Af-Maay Development Center (ADC)
Email: afmaaydevelopmentcenter@gmail.com
Office: Baidoa, Sheekh, S/Land, Muqdishu i Örebro, Sweden

Wargiling:

Dooqaadky Hoghol maaybaa ha dhawaayee walaaghii taly ii fikirid ky saabsing hurmariyoky Afky-Maayky: Haniikily hariir: Qofkii haayo, qoraaly, taariikdy, suugaanty Afky-Maayky, haniingky dir:

Eamil. afmaaydevelopmententer@gmail.com

Goobty Horumriyowky Afky- Maayky - Afmaay Developmment Center (ADC)

c/o Sydvästsomaliska Riksförbundet I Sverige

Föreningarnas Hus

Slottsgatan 13A, 70361Örebro, Sverige

Tel. 019-133110

E-mail: sydvast.somaliska@outlook.com

Manhaj Jangjeero

Manaahijta Walbarashootha Dowladda Federaalky mi dheelitiring.

1- Buugaagty Mahaa tirileey ky qoronyiing

2- Gopolee koofureed afshoo, taariigdiyoo iyo Dhaghanshoo ku moqonyiing buugty taariikdy iyoonaay haang af Soomaalighy addaala dorruwaa hal sahooy

AMDC